

Shuruudaha daynta – Kaalmaha; Daryeelka caafimaad ee gobolka Gävleborg

DAYNTA KAALMADA

Waxaad soo amaahatay kaalmada waxaan rajaynaynaa inaad ka faa'idsan doonto. Kaalmadu waa mid shaqsi ahaan la tijaabiyay oo ku haboon baahiyahaaga. Ma amaahin kartid cidna umana sii gudbin kartid cid kale. Your Dayntaada kaalmada waxa ku diwaangashan bixiyaha daryeelka caafimaad. Qofka qorayaawaa waa shaqsiga kujira nidaamka daryeelka caafimaad ee qiimaynta, baadhista iyo lasocoshada. Qofka qorayaawaa wuxuu xaq u leeyahay inuu dib u qiimeeyo baahidaada, tusaale hadii xanuunkaaga ama xaaladaada guryayntu isbadashay ama hadii aanad isticmaalin kaalmadaada sidii loogu talagalay. Dib u qiimaynta waxa ka dhalan kara in qofka qorayaawaa dib ugu noqdo ama uu badalo agabka kaalmada.

ISTICMAALKA AGABKA, TILMAAMAHAA IYO DARYEELKA

Masuuliyadaadu waa inaad isticmaasho, ilaalso oo aad nadiifiso agabka kaalmada sida ku xusan isticmaalka agabka iyo tilmaamaha uu ku siiyay qofka qorayaawaa, markaa agabka caawinta si sax ayuu u shaqaynayaa oo lagamana yaabo inuu rifmo oo uu madho(tusaale., tusaale baytariga la dabeeyo, nadiifinta agabka, naqasaynta taayirada, iwm.). Agabka lasoo amaahday waxa lagu kaydin doonaa meel ku haboon. Ma samayn kartid talaabooyinkaaga ama saamaysid agabka lasoo amaahday.

Hadii aad qabto wax su'aalo ah ama hadii dhacdo/kadis ah, la xidhiidh qofka kuu qoray

CAYMISKA

Agabka caawinta waa muhiim marka laga eego caymiska isticmaalka shayada gaarka ah ee dhaqdhaqaqaqaya. Adigu cida aad kasoo amaahatay qalabka caawinta, way adagtahay inaad ku qanciso inay la xidhiidhaan shirkadaada caymiska si ay u hubiyaan in gurigaaga haduu wax ku noqdo agabka kaalmadu ay bixiso ama gasho caymis gaar ah. Lacagta caymiska iyo kharashka dheeraadka ahba adigaa bixinaya.

LACAG BIXINTA MAGDHAWGA EE DAGMADA

Waxa laga yaabaa in dayn lagugu yeesho magdhaw hadii agabka kaalmada dhaawac soo gaadho kaasoo baxsan sidii caadiga ahayd ee uu ahaa, hadii uu lumo iyadoo dayac xagaaga ahi jiro, ama hadii lasoo celiyo isagoon sax ahayn. Sidoo kale waxa laga yaabaa in lagugu yeesho inaad magdhaw bixiso hadii aanad isticmaalin agabka kaalmada sidii loogu talagalay in looga faa'idaysto.

GUURIS

Hadii aad doonayso inaad guurto, fadlan la xidhiidh qofkii kuu qoray si aad uga hesho macluumaa dheeri ah sida ugu macquulsan. Hadii agabka caawinta aad doonayso inaad gayso guriga cusub, waa inaad adigu bixisaa kharashka ku baxaya qaadista agabka kaalmada. Wareejinka sariirta caafimaad waa inuu amraa qofkii kuu qoray.

DAYACTIR

Hadii wax qalad ahi ku dhaco agabkaaga kaalmada, la xidhiidh Hjälpmadel SAM.

-Adigoo ka wacaya telefoonka 026-153522

-Ama usoo maraya app-ka "Hjälpmadel SAM" kaasoo aad ka dajisan karto Google play iyo Appstore

-Adigoo u maraya wabsaaytka gobolka Gävleborg: [Complaint - Hjälpmadel SAM](#)

-Ama qofkii kuu qoray, kaasoo tijaabiyay agabkaaga kaalmada

Hadii aad rumaysantahay in badqabkii wax soo gaadheen badqabka isticmaalka agabka kaalmada, lama isticmaali karo ilaa ka cilad bixiyo.

MARKAAD SOCDAALAYSO

Dhacdada waxyeeladu kasoo gaadhad agabka kaalmada tusaale, Socdaal xaga hawada ah/kabitaanka adeegyada gaadiidka, sheegashada caymiska waa inay ka dhacdaa si toos ah goobta qaadaha/diyaarada ama wax u dhigma oo shirkadaadu caymiskuma joogtaaa. Had iyo jeer la tasho qofka kuu qoray. Gaadiidka iyo kharashka dayactirka inta lagu gudo jiro joogistaada dibada ma bixinayaan golaha/dawladu. Amaahdaha agabka kaalmadu isagaa ka masuul ah kharashaadka, oo isagaa bixinaya ama caymiska u maraya.

SOO CELINTA

Marka baahidu dhamaato ama agabka kaalmada laga maarmo, agabka waa in lasoo celiyaa isagoo nadiif ah. Hadii waxoogay laga hagaajiyay agabka kaalmada waxa laga yaabaa inay dib u furaan qolada Hjälpmadel SAM kahor intaanay soo celin.

Macluumaa dheeraad ah oo ku saabsan sida loo hagaajinayo agabka kaalmada, u gudbi